

Suaalo la xiriira kireysiga

QSTARS waa adeeg lacag la'aan ah, talobixin madaxbanaan iyo adeegga gudbinta ee loogu talagalay dhammaan kireysteyaasha Queensland.

Khadka talo bixinta:

1300 744 263

Haddii aad u baahan tahay turjubaan nala soo socodsii ama marka hore kla xidhiidh Adeegga Turjubaanka Taleefoonka ee Qaranka (TIS) lambarka 13 14 50.

QSTARS waxay kaa caawin kartaa:

- Talo-bixin iyo caawimaad si aad u ogaato xuquuqda iyo waajibaadka kiraysigaaga
- Taageero lagu xalliyo arrimaha kiraysigaaga
- Ka-caawinta inaad la hadasho kireeyahaaga ama wakiilkaaga
- Caawimaad qorista warqad ama buuxinta foomamka kireysiga
- Caawimaad inaad ka qaybgasho ama u diyaargarowdo dhageysiga maxkamada kiraynta QCAT
- U-gudbinta adeegyada kale haddii loo baahdo



Tenants Queensland

Barnaamijka QSTARS waxaa maamula Tenants Queensland waxaana lagu bixiyaa wadashaqeyn lala yeesho haya'daha iskaashiga ee Queensland.

Funded by



**Queensland
Government**

QSTARS waa adeeg talo bixin lacag la'aan ah oo loogu talagalay dhammaan kireystayaasha Queensland.

Ka wac QSTARS 1300 744 263 haddii aad u baahan tahay talooyin la xiriira dhibaatooyin dhanka kirada ah ama booqo www.tenantsqld.org.au.

Websaydhkeena wuxuu leeyahay nidaam kuu fududeynaya (Reach Deck Toolbar) inaad hesho macluumaadkeena. Nidaamkaas wuxuu kuu sahlayaa in qoraalada laguugu badalo hadal, sidoo kalena wuxuu kaa caawinayaa akhriska iyo fasiraada luqadda.

Tenants Queensland waa adeeg bulshadeed iyo sharciyeed ee dowlad-goboleedka oo dhan ah waxayna bixisaa barnaamijka QSTARS iyadoo lala kaashanayo:

- **Xarunta Sharciga Bulshada ee Tasc (Tasc Community Legal Centre)**
- **Bulshada iyo intii lagu daray (Community Plus+)**
- **Kor u qaadida daryeelka (Enhance Care)**
- **Xarunta Xaafada ee Hervey Bay (Hervey Bay Neighbourhood Centre)**
- **Adeeg Udoodis Madaxbanaan oo Gobolka ah (Independent Regional Advocacy Service - IRASI)**
- **Xarunta Sharciga ee Bulshada Mackay (Mackay Regional Community Legal Centre)**

